



## Barnaamijka AVID, IB oo gacan ka geystay kordhinta heerarka qalin-jabinta ee Cleveland

Markii [heerarka qalin-jabinta ee guud ahaan gobolka ee loogu talagalay 2017-18 la soo saaray Janaayo](#), waxay war wanaagsan u keeneen Dugsiyada Dadweynaha Portland, taasi oo la arkay kor u kac gaaraysa 2 dhibcood boqolkiiiba, oo ah sanadkii sagaalaad oo isku xigta ee degmadu aragto korodhka. Goobta Dugsiga Sare ee Clevend, waxaa jiray xataa sabab dheeraad ah oo loo dabaaldego iyada oo dugsigu arkay korodh dhan 3.9 dhibcood, kaasi oo ah ka ugu sarreeya ee dugsiyada PPS, isaga oo gaaray 91 boqolkiiiba.

Sidee bay Cleveland u gaartay korodhkani oo kale? Maamulaha Ayesha Freeman ayaa sheegtay in ay jiraan sababa badan, balse labo ayaa aad u muuqda: AVID iyo IB.

AVID (Horumarka La Adeegsanayo Aayo Ka Tashiga Qofka) waa barnaamij ka caawiya ardayda in ay helaan istiraatijiyyada iyo habab si ay u gaaraan guul tacliimeed, barashada siyaabo badan oo wax ku ool ah oo wax loo akhriyo, qoraalo qaadashada ‘take notes’, habeynta naftooda, barashada iyo la xiriirka macallimiinta. Inta badan, waxaa ka faa’ideysta ardayda iska dayaysa in ay noqdaan kuwii u horeeyay ee qoyska ay ka tirsan yihiin ee aada kulliyad, ama laga yaabo in aanay helin taageerada waxbarasho ee dadka kale ka helaan guriga.

Marka la joogo Cleveland, AVID waxaa la bixiyya isaga oo ah fasal la doorto oo bilaabma marka ardaygu ku jiro sanadka hore ee dugsiga iyada oo ardaygu sida caadiga ah uu ula joogayo macallin iyo fasal isku mid ah dhammaan afarta sano.

“AVID waxay runtii bixisaa taageerada iyo qorshe istiraatijiyyadeed oo ku saabsan sida loogu gudbo dugsiga sare si ay ugu qalmaan jaamacad afar sano ah,” ayay sheegtay Julia Blattner, oo isku duwaha AVID ka ah Cleveland tan iyo markii barnaamijka lagu daray 2011-kii.

Dugsiyada kale waxay qaateen hab kale oo wax loo qabanayo ee lala leeyahay AVID. Madison, tusaale ahaan, [waxay isticmaashaa barnaamijka dugsiga oo dhan AVID](#). Madison sidoo kale waxay aragtay kor u kac ku yimid heerarka qalin-jabinta, taasi oo ah kor u kac gaaraya 2 dhibcood boqolkiiiba isaga oo gaaray 83 boqolkiiiba, marka la eego warbixintii Janaayo.

Cleveland waxay leedahay qiyaastii 130 arday oo ka qaadanaysa fasalka la doorto ee AVID, waxaana jira caddeyn cad oo tilmaamaysa in xirfadaha ay baranayaan yihiin kuwo is bixinaya: Saddex sano oo isku xigta, 100 boqolkiiiba xubnaha ka tirsan fasalka AVID ayaa qalin-jabiyyay. Wuxaan jira faa’idooyin dheeraad ah, Blattner ayay sheegtay.

“Mid ka mid ah waxyabaha ugu abaalmarinta badan ma aha oo kaliya in carruurta ay gaaraan hadafkooda, balse sidoo kale isbeddelka ardayga dhabta ah aad ku aragto sanadkooda saddexaad iyo sanadkooda u dambeeyaa dugsiga,” ayay sheegtay. “Waa kuwo furfurnaan leh, waxaad arki kartaa in ay naftooda qiime dheeraad ah u yeelayaan.”

Cleveland waxay sidoo kale ka faa'iideysatay Shahaadada Caalamiga ah ee loogu talagalay dhammaan hababka wax loo qabto. Sanadkii saddexaad sano ee isku xigta, arday kasta oo sanadkii saddexaad dhigta Cleveland wuxuu qaataf fasalka IB Ingiriisiga, iyada oo sanadkani, arday kasta oo sanadkii saddexaad dhigtaa uu bilaabay qaadashada Taariikhda IB.

Dugsiga Sare ee Lincoln, oo lahaa qiyaasta sare ee heerka qalin-jabinta ee PPS oo dhan 94 boqolkiiba, ayaa sidoo kale si weyn ugu lug yeeshay waxbarida IB.

IB waxay diirada saartaa hab caalami ah, hab aqoon sare loo leeyahay, iyada oo ardaydu ay baranayaan sida loogu fikiro si adag oo madax bannaan, iyo sida wax loo codsato oo leh daryeel isla markaana caqli gal ah. Iskata oo IB ay leedahay sumcad ah ahaanshaha mid adag, daraasado ayaa muujiiyay in ardayda halganka la geliyo ay si fiican jawaab u bixiyaan.

“Wuxuu arday badan siyyaa fursadaha ay ku yeeshaan waxbarasho aad u dhammeystirsan,” ayay sheegtay Linda Smith, oo ah maamulaha IB iyo TAG (Dadka Xirfadda & Hibada leh) ee loogu talagalay PPS. “Maskaxdayda waxaan ku hayaa, in uu sheegayo ardayda, “fiiriya guusha aad gaari kartaan.””

Freeman, oo ku jirta sanadkeedii labaad ee ay tahay maamulaha Cleveland, waxay IB dadka oo dhan loogu talagalay ka dhaxashay maamulihii ka horreeyay, Tammy O'Neill, oo dejiyay isaga oo dhiirigelin ka helayay macallimiinta.

“Markii aan ku soo biiray sanadkii la soo dhaafay, waan ku faraxsanaa oo u riyaaqay sababta oo ah hal aburnimadiisa iyo fikirkiisa hore,” ayay sheegtay Freeman. “Waxay la timaadaa halgan badan, laakiin waa shaqada aan u baahanahay in aan qabano.”

Freeman waxay sheegtay in habka IB wax u qabato ee ay ardaydu bartaan Ingiriisiga iyo Taariikhda lagu dhex daro maadooyinka kale.

“Cilmi-baarista ayaa muujinaysa in ardayda, marka heerarka wax akhriska/qorista kordho, ay taasi u gudubto dhanka fahamka tirada,” ayay sheegtay Freeman. “Sidaa darteed marka aan kordhino heerarka wax akhriska/qorista iyaga oo laga dhigayo in ay awoodaan fasalka luqadda farshaxanka adag oo ah heerka fasalka 11<sup>-aad</sup>, waxaan runtii dhiirigelinaynaa awoodooda guud si ay qabtaan shaqo wanaagsan oo dhanka xisaabta ah.”